**INJIRTA MADAXA GASHA – sidee la isaga cirib tiraa injirta**

**Injirta waxaa lagu kala qaadaa badanaa kontakti ama istaabasho madax uu madax kale taabto ah**

Injirtu waxay badanaa uga wareegtaa madaxa qofka qaba madax qof kaleeto, sida marka caruurtu ay cayaarayaan madaxooda oo u soo dhawaad ama is taabta. Iyo qalabka timaha loo isticmaalo, sida shanlada, burushyada timaha, shukumaanada, shuushadaha timaha lagu xirto, wax kastoo madaxa la saaro sida masar ama koofiyad waa lagu kala qaadaa injirta oo waa suurtogal inay ku faafto, laakiin uma badna sidaas. Qaadista la qaado injirtu ma aha nadaafad daro qofka ah, saamayna kuma laha guriga iyo timaha oo la nadiifiyo.

**Shanlada yaryar ee injinra loogu talo galay waa qaabka ugu wanaagsan ee looga hortago injirta**

Inta badan injirtu waxa ay keentaa waa xajiin ama cun-cun madaxa ah, laakiin dadka oo dhami ma dareemaan cun-cun, sidaas aawadeed waxaa fiican in dadka xubnaha qoyska ka mid ah oo dhan iyo dadka ay wax isku darsadaan oo u dhow-dhow oo dhan qof kasta gaarkiis looga baaro, xataa haddii uusan xajiin iyo cun-cun dareemayn. Inaad qaaday
waxaa lagu dareemaa marka aad timaha ugu shanlayso iyaga oo qoyan ama qalalan (daawada loogu talogalay) sida soocota ee hoos ku qoran. Shanlada injirta waxaa lagu gadaa farmashiyeyaasha. Masullyadda ah inaan injirtu faafin in la hirgeliyo oo la iska daaweeyo waa mid guriga saaran.

**Shanlaynta timaha oo qoyan**

- Timaha waxaa lagu soo qooyaa biyo, ka dibna si tartiib ah ayaa shukumaan loogu qalajiyaa.
- Timaha waxaa la mariyaa oo la wada gaarsiiyaa daawada, taas oo ka dhigaysa in si fudud loo shanlayn karo.
- Timaha murugsan ama raanta ah waxaa lagu shanleeyaa shanlo ilko adag ah ama gar-feer adag.
- Timaha waxaa loo shanleeyaa gadaal, marna waxaa laga bilaabaa shanlada dhexda oo ilaa iyo foodo hore la soo wadaa.
- Shanlada injirta loogu talo galay ee ilkaha yaryar leh iyada waxaa laga bilaabaa wajiga foodiisa hore waxaana toos loogu wadaa ilaa iyo jeegada dambe ee qoorta.
- Shanlada mar kasta waxaa laga bilaabaa timaha salkooda oo waxaa loo wadaa oo lala raacaa dhakada iyadoo loo wadayo ilaa iyo oogada kore ee timaha.
- Mar kasta oo aad shanlada ku shanlayso timaha oo sida la soo sheegay u wado waa inaad shanlada ku nadiifiso waraaqaha faraha la iska mariyo, waxaa markaas shanlada lagu fiiriyaa nal cad oo iftiin badan, iyadoo la eegayo bal in shanlada iyo warqadda ay injiri ku hartay. Haddii loo baahdo waxaa isticmaali kartaa oo ku eegi kartaa muraayad weyneeyso ah.
- Timaha intii la shanleeyey ee isku xiran gooni ayaa la isaga wareejiyaa. Sidaas baana nidaam loogu wadaa oo marba qayb loo shanleeyaa, ilaa iyo inta aad madaxa kala bar ka shanlaynayso oo fooda ilaa iyo jeegada u wada shanlaynayso. Ka dib waxaa shanlada lagu bilaabaa madaxa haafkii kuu haray oo isla sidii hore loo shanleeyaa.

**Shanlaynta timaha oo qalalan**

- Qofku waa in uu fariisto miiska agtiisa isaga oo suxuladiisa miiska ku cuskanaya madaxana miiska ku foorarinaya. Timaha waxaa loo laad-laadiyaa horay.
- Miiskana waxaa la saaraa warqad cad.
- Timaha waxaa lagu shanleeyaa shanlo caadi ah ama burushka timaha.
- Waxaa si gaar ah timaha looga baaraa oo lagu bilaabaa in labada dhinacba lagaga shanleeyo shanlada injirta loogu talogalay.
- Timaha waxaa shanlada injirta loogu shanleeyaa iyadoo laga soo bilaabayo xagga jeegada oo dhinacca wajiga loo wadayo ilaa iyo xagga kala jiidka timaha, ka dibna halkaas ayaa hoos looga wadaa ilaa iyo madaxa hoose.
- Waxaa lagu fiiriyaa nal aad u iftiin badan, in warqadda miiska saaran ay injiri ku soo daadatay. Haddii loo baahdo waxaa isticmaali kartaa oo ku eegi kartaa muraayad weyneeyso ah.

Fiidiyoow halka ka daawo sida loo shanleeyo timaha ah:
http://www.vakehyva.fi
eraga aad galinayso oo ku raadinayso fiidiyoowga waa: päätäi video

**In markaad sidaas u baarto ogaato in injiri madaxa kaa gashay waxaa lagu ogaadaa haddii aad hesho hal baxo oo kaliya oo nool oo injir ah**

Ugaxda ama ukunta injirta laftigeedu waxay sidoo kale calaamad u tahay in ay injiri ku gashay. Hase ahaatee waxaad xasuusnaataa oo ogaataa in ugax dhimatay ay in badan ku harayso timahaaga markaa iska daweeyso xataa ka dib.

**Kaliya waxaa laga daweeyaa dadka qaaday injirta, daawada injirta waxaa ka helaysaa oo ka iibsan kartaa farmashiga**

Dhammaan dadka qoyska ka mid ah waa in lagu sameeyo baaritaan oo madaxooda injir laga baaro (=waxaana lagu baaraa timaha oo lagu shanleeyo shanlada ilkaha yaryar ee injirta), laakiin daawada injirta lagu saaro oo lagu buriyo waxaa la siiyaa dadka injirta qaba bas oo la hubiyey inay ku dhacday injirtu. Dhammaan dadka injirta laga helay waa in hal mar hal wakhti laga wada daweeyo, waliba waxaa fiican hal maalin in daawada la wada sameeyo. Waxaa la hubaa oo dhab ah in aysan jirin wax gaar ah oo keeni kara oo hortag ah jirin.

Farmashiga waxaa yaalaa daawooyin kala duwan oo kala nooc ah, kuwaas oo qaarkood ay aad u awood badan yihiin, qaarna awoodooda lama hubo; kuwa ay ku jirto maadada loo yaqaan Dimetikoni ayaa inta badan awood xooggan leh. Shaanbooyinkii waligood soo jireenka ahaa sida (Prioderm® ja Nix®) iyaguna badanaa awood ayeey leeyihiin, laakiin la soco iyaga laftigooda injirta qaarkeed waa ay la qabsatay oo waxay awoodaa inay iska difaacdo oo aysan waxba ka tarin.

**Daaweeynta waa in aad ku celceliso daawadaa doontaba isticmaaloo 7 - 10 maalmood, ogoowna shanla ku saarista laftigeedu waa muhiim**

Halka mar oo ugu horeeya khasab maaha in ay daawadu disho dhammaan injirta ugaxdeeda, sidaas aawadeed waxaa suurtogal ah in ugaxda nool ee harta ay ka dilaacdo injir cusub oo hor leh. Ugaxdu waxay dilaacdaa 10 bari ka dib markii ay dhalatay, waxaana ku hor istaagi kartaa injirta in aad shalada ilkaha yarayar ugu yaraan maalin dhaaf ugu shanlaysato. Haddii marka aad mar labaadka iska daweyso injirta xabbad injir ah oo nool madaxaaga ka weydo waa lagu guuleeystay daweyntii, xataa hadii ay wali timahaaga ku jiraan ugaxdii injirtu. Haddiise aad iska hesho injir nool, daaweynta waa in aad mar kale ku celiso, laakiin marakan waa in aad isticmaasho nooc kale oo ka duwan dawadiii hore. Shanlaynta waa in aad wado todobaad kasta hal mar mudo dhawr todobaad ahna aad sidaas ku wado.

**Iskoolka ama xanaanada in looga maqnaado iska daweynta injirta looma baahna**

Injir baa laga qaadaayaa aawadeed ilmaha lama oran karo iskoolka iyo xanaanada ha looga fariisiyo, ilmahana isagoo iskoolka ama xanaanada jooga lagama soo cayrin karo injir daraadee. Ilmuhu wuxuu xanaanada ama iskoolka ku noqon karaa marka daaweynta ugu horaysaa u dhammaato ka dib.

**Nadaafad siyaado ah in la sameeyo guriga looma baahna**

Qofka marka ay ka dhacdo injirtu waxay lumisaa awoodda ay meel ku qabsan karto oo marka ay joogto 1-2 maalmood meelna ma qabsan karto, sidaas aawadeed guriga iyo xanaanada looma baahna in badaafad dheeraad ah la sameeyo. Kaliya waxaa loo baahan yahay in timaha shanlada lagu shanleeyo iyo wixii timaha taabta aad loo nadiifiyo.

- Timaha ay injirtu gasho wixii qalab ah oo taabta sida (burushka timaha, shanlooyinka, shukumaanada timaha lagu tirtiro iyo wixii la xirto sida koofiyad ama masar iwlm.) waa in meel gaar ah la dhigo oo aan la isticmaalin laba habeen iyo laba maalmood ama maalin kasta la nadiifiyo: burushyada timaha iyo shanloyinka waa in la dhex galiyo°biyo kulul oo + 60 C digrii ah) mudo 30 daqiiqo ah. Wixii qasaalad lagu dhiqi karo uma baahna biyo kulul ee in qasaaladda lagu dhaqo ayaa ku filan.
- Harqadaha barkimooyinka labada jeer ee daaweynta la samaynayoba waa in la badalo.
- Dharka kaleeto, go'yaasha sariiraha, kuraasta iyo qalabka guriga, roogagga, gaariga qoysku raaco gudihiisa iwl. in la nadiifiyo looma baahna mana aha muhiim.
- Gurigu uma baahna in lagu buufiyo sunta cayayaanka.

**Faafaahin dheeraad ah oo ku saabsan injirta madaxa gasha**:

Injirta madaxa gasha waa 1-4 mm dherekeedu, sidii dhalo camal ah oo dhinacceeda kale la arki karo oo midankeedu dameeri camal yahay, mana laha baalal sida cayayaanka duula, qaarkoodna timaha markay ku dhex jiraan si dhakhso badan ayeey ugu dhex socdaan madaxa. Injir markaas dhiig nuugtay oo dharagsan midabkeedu waa gaduud kafee xigeen ah. Injirtu ma boodo mana haaddo, saasna uguma socon karto meel aan timo lahayn ama meel siman oo sibibix ah. Marka ay soconayso waxay u baahan tahay ugu yaraan timo dhererkoodu yahay 5mm.

Ijirtu timaha iskeed ugama baxdo, ee waaba ku dhex tarantaa haddaan laga daaweyn oo laga saarin. Waxaa cunto u ah oo ay ku nool yihiin dhiigga dadka, cimri nololeedkeeduna waa qiyaastii hal bil oo kaliya.  Mudadaas ay nooshahay tan dhadigi ahi waxay dhashaa 100-300 uu ugax ah, ugaxdaas oo ay ka dilaacaan jiilkii cusbaa qiyaastii 7 maalmood ka bacdi. Dadka jirkiisa injirtii banaanka uga baxdaa waxay ugu badnaan noolaan kartaa 1-2 maalmood, waxaana inay tarantaa oo dhashaa go'aa mudadaas wakhti wax badan ka yar.

Ugaxda injirta oo loo yaqaan qandhicil waxay timaha uga dhex muuqdaan cad-cadaan yaryar oo kuus-kuusan wax u eg oo timaha ku dhex dhagan. Cabirka qandhicilkuna waa wax ishu yaa alaah diriq ku arki karto, qiyaastii 0,8 mm dherer ah. Faraha hore afkooda markaad timaha ku soo jiido waxaa dareemaysaa wax yar oo ku dhex jira timaha iyo inaan timuhu sinayn ku dareensiinaya, waxaas yar oo timaha xoog ugu dhagan. Meelaha timaha ugu fudud ee qandhicilka laga heli karaa waa timaha dhagaha dushooda iyo dhafoorka ka koreeya, kuwa jeegada dambe qoorta ku yaala iyo sidoo kale fooda hore ee timaha. Ugaxda nool ama qandhicilka aan dhiman inta badan wuxuu qabsadaa oo ku dhagan yahay meel timaha jiridooda ka koraysa 6 mm. Markii ay ugaxdu injir u dilaacdo, ukuntii faaruqqa ahayd waxay ku hartaa oo ku dhaganaataa timaha oo timihu markay si fiican qofka ugu baxaan ayaa ugaxda faaruqqa ah timaha cad-cadeenkeedu si fiican uga muuqdaa. Ugaxdu meesha ay timaha kaga dhagan tahay markaas ayaa waxaa laga garan karaa inay tahay ugax nool ama mid dhimatay ama qolof faaruq ah.

Xogtaan waxaa soo ururiyey: Gudiga shacabka ee khuburada ku ah injirta madaxa gasha.